



Psykisk helse

SOMALI

Kalsooni qaanuun

haddii khasab yimaado

Rettssikkerhet ved tvang/Legal protection



Guddiyada kormeerka ee daryeelka caafimaadka nafsadda

Guddiyada kormeerka ee daryeelka caafimaadka nafsadda waxay shaqadooda ugu weyni tahay ilaalinta kalsoonidaada qaanuun.

Dhammaan xarumaha, cusbitaalada lagu daaweeyo cudurrada maskaxda iyo bukaansocodyada daryeelka caafimaadka nafsadda waxay ku xiran yihiin guddi kormeer.

Guddigan kormeerka waxaa madax u ah qof sharci yaqaan ah, waxaana kale oo uu ka kooban yahay hal dhaqtar iyo labo xubnood oo kale. Labada xubnood oo kale mid ka mid ah waa inuu laftigiisu horey u soo bukoodey ama qaraabo la yahay qof buka ama soo bukooday, ama uu matali jirey dano bukaan iyadoo taasi shaqadiisa ay ahayd ama xil ahaan uu u soo hayay.

Shaqada guddiga kormeerka

- Guddiga kormeerku waa unugga cabashada loo qaato haddii qof laga gaaro go'aan daryeel caafimaadka nafsadda oo khasab ah (khasab cusbitaal ku seexin (tvangsinnleggelse)), iyo go'aammada kale ee khasabka la isticmaalayo.
- Guddiga kormeerku wuxuu, xataa ayadoon loo caban, sidoo kale is-kiis u kormeeraa go'aan kasta oo ku saabsan daryeel caafimaadka nafsadda oo khasab ah (khasab cusbitaal ku seexin (tvangsinnleggelse)), waxa kale oo ay si otomaatik ah u eegaan go'aanka 3 bilood kadib markii qofka lagu khasbay in la dhigo cusbitaal. Sidoo kale waa in guddigu oggolaado haddii la rabo in daryeelka khasabka ahi sii socdo wax sannad ka badan.
- Sidoo kale guddiga kormeerku wuxuu kormeeraa daaweynta iyadoo aan oggolaasho gaar ah taa loo helin lana isticmaalayn wax khasab ah. Intaa ka sakow wuxuu guddigu samaynayaa kormeerka uu u arko inuu lagamamaarmaanka u yahay wanaaggaaga.

Waxaad cabasho ka qaadan kartaa...

Haddii aad tahay bukaanka ama qaraabada ugu dhow ee bukaanka, waxaad guddiga kormeerka uga caban kartaa go'aanka ku saabsan:

- *La socosho ama daryeel caafimaadka nafsadda oo khasab ah (khasab cusbitaal ku seexin (tvangsinnleggelse))*
- *Sii wadidda ama joojinta daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah*

Qofna laguma hayn karo daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah haddii aanay meesha oollin shuruudaha uu arrintaa ka dhigayo sharciga daryeelka caafimaadka nafsaddu. Qofka go'aanka gaaray waxaa waajib ku ah in uu si isdabajoog ah u qiimeeyo in shuruudahaas la buuxiyey, haddii aan la buuxinna waa in go'aanka la joojiyo (laga saaro qofka dhakhtarka). Sidoo kale waxaad adiga (qofka buka) iyo qaraabadaadu xaq u leedihiin in aad marka aad rabtaan codsan kartaan in la joojiyo daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah.

- *Hirgelinta daryeelka caafimaadka nafsadda ee carruurta iyo dhallinyarada ay da'dooda u dhexeyso 12 ilaa 16 sano.*

Hirgelinta daryeelka caafimaadka nafsadda ee carruurta iyo dhallinyarada ay da'doodu ka hooseyso 16 sano, waxaa shuruud ah in la helo oggolaanshaha waalidka ama cidda kale ee masuulka ka ah carruurta. Haddii carruurta da'doodu gaadhey 12 sano* oo ilmuhu diido go'aanka, waxa markaa go'aanka daryeelka caafimaadka nafsadda ee ilmaha gaadhaya guddiga kormeerka. (* Hawshan waxqabadku waxay keenaysaa in ilmaha la dhigo cusbitaal)

- *Oggolaasho ah in ilaa saddex toddobaad la hoos tago xeerarka daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah.*

Haddii aad si ikhtiyaari ah u doorato waxaad oggolaan kartaa inaad ilaa saddex toddobaad hoos tagto xeerarka daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah. Qofka maaddo ahaan mas'uulka ah go'aankiisa ah in oggolaasho la helo, waxaa loo gudbin karaa guddiga kormeerka.

- *Ubeddelidda meel kale ama hawl waxqabad oo kale.*

Dhammaanba go'aammada lagaaga beddelayo meesha aad ku jirtay iyada oo la rabo in lagu wareejiyo meel kale ama hawl waxqabad oo kale (tusaale ahaan; daryeel khasab ah oo cusbitaalka loo hooyanayo iyo daryeel khasab ah oo aan cusbitaalka loo hooyanayn), cabasho ayaa laga qaadan karaa. Cabashada go'aanka noocan ah, waxay sida caadiga ah keentaa inaan lagu beddeli karin ilaa cabashada go'aan laga gaarayo. Laakiin taasi ma dhici doonto, haddii xaaladdaadu tahay mid lagamamaarmaan ka dhigeysa in hakad la'aan lagu beddelo.

- *Isticmaalka aalado wax khasba iyo hawlgallo wax xadeynaya (tvangsmidler og restriktive tiltak) marka la fulinayo daryeelka caafimaadka nafsadda*

In qofka lagu khasbo daryeelka caafimaadka nafsadda macnaheedu ma aha in qofka lagu soo rogi karo hawlgallo khasab ah. Hawlgallo khasab ah waxaa la fulin karaa oo keliya marka la gaaro go'aan qiil ka haysta sharciga, isticmaalka khasabkuna wuxuu dhici karaa oo keliya markuu yahay lama huraa, loona baahan yahay.

Go'aammada looga caban karo guddiga kormeerka:

- Dhawrid (skjerming)
- Adkeynta xaqa in lagu soo booqdo, inaad telefoonka dirsato, in waraaqo lagu soo diro ama aad dirto.
- Baadhidda qolkaaga iyo alaabtaada iyo jidhkaaga oo la baadho.
- Haddii wax lagaala wareego

- Qaadidda tijaabo kaadi
- Isticmaalka waxyaalo khasbid ah (xoog, takoorid, daawo)

Go'aan ah in lagu baadho iyo in lagu daaweeyo adiga oo aan raalli ka aheyn, waxaad uga caban kartaa badhasaabka gobolka (Fylkesmann).

Guddiga kormeerku mar kasta waa ay eegaan dhammaan daweynaha khasabka ah markey akhriyayaan faylalka khasabka.

Sida aad cabashada u qaadnayso

Cabashada guddiga kormeerka waxa loo gudbin karaa qoraal ahaan amaba afka. Waxa cabashadan loo gudbin karaa shaqaalaha caafimaadka oo cusbitaalka jooga, kuwaas oo u sii gudbin doona guddiga kormeerka. Ama waxa si toos ah loogu gudbin karaa guddiga kormeerka, warqad ahaan ama telifoonka ama marka ey gudidu yimaadaan isbitaalka.

Haddii aad u baahato waxaa qorista cabashada kaa caawinaya shaqaalaha caafimaadka ee isbitaalka.

Xaqa qareen Bilaash ah

Qofka bukaanka ah wuxuu xaqa u leeyahay qareen bilaash ah, taasi macnaheedu waxay tahay in aan wax lacag ah kaaga baxayn qareenka haddii aad ka cabaneyso go'aannada hoos ku qoran:

- Baadhis dheeraad ah (la socosho (observasjon))
- Hirgelinta, sii wadidda ama joojinta daryeelka caafimaadka nafsadda oo khasab ah (khasab cusbitaal ku seexin (tvangsinnleggelse))
- Meel kale u wareejin

- Carruurta ay da'dooda u dhexeysa 12 -16 kuwaas oo aan raalli ka aheyn in la seexiyo daryeelka caafimaadka nafsadda

Sidan ayaa cabashadaada looga baaraandegaa

Ka hor inta aysan guddiga kormeerku gaadhin go'aankooda, waxaa muhiim ah in kiiska si wanaagsan uu u cad yahay oo aanuu shaki ku jirin.

Iyagoo kiiska diyaarinaya ayay guddigu inta badan ka codsadaan qofkii maaddo ahaan masuulka ka ahaa go'aanka inuu si qoraal ah uga soo warbixiyo go'aanka.

Waxaad mar kasta leedahey fursad ah inaad wax ka tidhaahdo kiiska ka hor inta aaney guddiga kormeerku gaadhin go'aankooda.

Kiisaska ku saabsan la socosho khasab ah (tvungen observasjon) ama daryeel caafimaad nafsi oo khasab ah iyo weliba kiisaska ku saabsan qofka oo meel kale loo wareejinayo, dhammaan kiisaskan waxaa la qabtaa shir inta aan go'aan la gaadhin. Adiga oo ah qofka buka (ama haddii kale qof ku metelaya) waxaad xaq u leedihiin inaad ka qeybqaadataan shirkaas.

Guddiga kormeerku waxey gaarayaan go'aan qoraal ah oo sababeyaan. Sida caadiga ah wuxuu qaataa labo toddobaad kadib markii cabashada la heley.

Haddii uu guddigu cabashada soo diido, cabasho noocan oo kale ah lama soo diri karo ilaa ey ka soo wareegto muddo lax bilood ah.

Cabashada go'aanka guddiga kormeerka

Adiga iyo qaraabadaada waxaad mararka qaarkood go'aanka uga caban kartaan maxkamadaha.

Waa inuu markaa go'aanku ahaado mid markaas taagan. Guddiga kormeerka ayaa kaa caawineya inaad qareen la xidhiidho. Markaa waxa aad xaq u yeelanaysaa caawimo qaanuun oo bilaash ah.

Tani waxay khuseysaa:

- Kiis ku saabsan hirgelinta ama sii wadidda daryeel caafimaadka nafsadda oo khasab ah
- Go'aan lagaa wareejinayo daryeel caafimaadka nafsadda oo khasab ah oo maalintii cusbitaalka la joogayo isla markana la rabo in lagugu wareejiyo cusbitaal daryeel caafimaadka nafsaddu khasab yahay oo maalintii iyo habeenkiiba la joogayo.

Guddiga kormeerku isagaa is-kiis u billaaba

Guddiga kormeerku isagaa is-kiis u kormeeraya in sharuudaha khasab ku seexinta sharci ahaan la soo buuxiyey, iyagoo eegaaya in go'aanku ku salaysan yahay shuruudihii sharciga oo si sax ah loo qiimeeyay.

Isbitaalku waa inuu u soo diro guddiga koobiyada dhammaan go'aannada la gaadhey ee ku saabsan baadhitaan dheeraad ah ama daryeel caafimaad nafsi ah oo khasab ah. Sidoo kale waxaa muhiim ah iney guddiga u soo diraan dhammaan dukumentiga ey go'aannadu ku salaysan yihiin.

Saddex bilood kadib markii qofka dhakharta khasab lagu dhigey, xataa haddii aan go'aanka khasab ku dhigida dacwad laga soo qoran, guddiga kormeerka ayaa qiimeynaya iney jirto sabab si khasab ah loogu sii hayo qofka. Waxey kale oo eegayaan inuu jiro qorshe shakhsiyeed loo sameeyey qofka.

Markey ka soo wareegto sannad waqtigii go'aanka daryeelka khasabka ah la gaadhey, haddii ey weli jiraan sababo ah in la sii hayo waa in guddiga kormeerku markaa ey oggolaadaan sii heyntaas.

Kormeerka samafalka (velferdskontroll) ee guddiga kormeerka

Guddiga kormeerku waxey ugu yaraan hal mar bishii soo booqdaan isbitaalada iyo qeybaha loo oggolaadey iney masuul ka noqdaan oo ku hayaan maalintii dadka ku jira daryeelka caafimaadka nafsadda ee khasabka ah. Xarumaha kale wuxuu guddigu booqanayaa ugu yaraan afar jeer sannadkii. Booqashooyinka qaar waxey noqonayaan kuwo kedis ah.

Inta guddigu booqashada ku gudo jiraan waxey la xidhiidhi doonaan dadka buka waxaaney kala hadli doonaan arrimaha ku saabsan joogitaanka meesha. Wuxuuna guddigu bixin doonaa talooyin iyo caawimooyin ilaa intii ay karaan.

Guddiga kormeerku wuxuu la soconayaa isticmaalka hawlgallada wax adkeyanaya. Mararka uu guddigu booqashada ku yimaado wuxuu eegi doonaa daaweynta khasabka ah-, baratakoolka waxyaalaha khasabka ah ee la sameeyo, iyo baratakoolka sida qofka loo dhawro.

Waxaa kale oo uu guddiga kormeerku baari doonaa inay xeerar degenaansho guri xarunta ka jiraan, haddii ay ka jiraanna inay yihiin kuwo waafaqsan sharciga iyo in kale.

Guddiga kormeerku waxaa kale oo ay u gudbin doonaan Kormeerka caafimaadka (Helsetilsynet) ee gobolka haddii ay xarunta ku arkaan xaalado khatar ah. Waxay kale oo ay la kulmi karaan oo ay arrimaha kala hadli karaan madaxda xarunta ama qofkii maaddo ahaan masuulka ka ahaa go'aanka khasabka ah.

Xuquuqda bukaanka

Bukaanka daryeelka caafimaadka nafsadda iyo qaraabadooduba waxay leeyihiin xuquuq la mid ah ta bukaannada kale sida uu dhigayo sharciga xuquuqda bukaanku.

Xaquuqda dadka buka waxaa ka mid ah in ay xaq u leeyihiin in la daaweeyo, iney dooran karaan in lagu daaweeyo cusbitaalkay rabaan haddii seexintu tahay mid la sii qorsheeyay, inay xaq u leeyihiin qorshe iyaga u gaar ah, inay xaq u leeyihiin warbixin iyo saameyn ku yeelasho, iyo weliba inay akhrisan karaan diiwaankooda. Shaqaalaha caafimaadka iyo guddiga kormeerka labadaba waxaa saran waajib sirqarin.

Guddiga kormeerku kama baaraandego cabashooyinka ku saabsan jebinta xuquuqda bukaanka. Cabashooyinka Sharciga xuquuqda bukaanka waxaad ku aaddineysaa Kormeerka caafimaadka ee gobolka aad deggan tahay. Warbixin intan ka badan oo ku saabsan xuquuqda bukaanka waxaad ka heli kartaa www.shdir.no/psykiskehelse

Ciwaanno muhiim

Guddiyada kormeerka ee dalka oo dhan waxaad ka heleysaa
www.shdir.no/kontroll

- **Fylkesmannen**
(Badhasaabka gobolka)
www.fylkesmannen.no
- **Statens helsetilsyn**
(Kormeerka caafimaadka)
Postboks 8128 Dep, 0032 Oslo,
Tlf: 21 52 99 00, www.helsetilsynet.no
- **Pasientombudene**
www.helsenett.no/pasientombud
- **Sivilombudsmannen**
(Stortingets ombudsmann for forvaltningen)
(U doodaha danaha rayadka ee baarlammaanka)
Postboks 3 Sentrum, 0101 Oslo,
Tlf: 22 82 85 00, Grønt nummer: 80 08 00 39,
www.sivilombudsmannen.no
- **Sosial- og helsedirektoratet**
(Agaasinka caafimaadka iyo bulshada)
Postboks 7000 St. Olavs plass, 0130 Oslo,
Tlf: 24 16 30 00, www.shdir.no

- **Helse- og omsorgsdepartementet**
(Wasaarada caafimaadka iyo daryeelka)
Postboks 8011 Dep, 0030 Oslo,
Tlf: 22 24 90 90, www.hod.dep.no

- **Urrrada danaha isticmaalayaasha**

Mental Helse Norge

(Caafimaadka maskaxda ee Norway)
Postboks 298 Sentrum, 3701 Skien,
Tlf: 35 58 77 00, www.mentalhelse.no

Landsforeningen for pårørende innen psykiatri (LPP),

(Ururka qaraabada bukaanka cudurrada maskaxda)
Møllerveien 4, 0182 Oslo,
Tlf: 23 29 19 68, www.lpp.no

Organisasjonen Voksne for Barn,

(Ururka dadka waaweyn ee carruurta)
Stortorvet 10, 0155 Oslo,
Tlf: 23 10 06 10, www.vfb.no

Norsk pasientforening: Kontoret for pasienthjelp,
(Ururka bukaanka ee Norway: Xafiiska caawinta bukaanka)
Pb 2714 Solli, 0204 Oslo,
Tlf: 22 55 18 66, www.pasient.no



Psyiskisk helse

IS-1467

Halkan ayaad caawin ka helaysaa

Warbixin dheeri ah

Xaalad degdeg ah – wac 113
Dhakhtar joogto ah/
Gargaarka degdegga ah
Telefoonka caawinta: 810 30 030

www.psykisk.no
www.psykiskhelse.no
www.mentalhelse.no
www.psykopp.no
www.nyinnorge.no
www.nakmi.no

Buugaag yaryar oo ku saabsan caafimaadka nafsadda



Welwel
IS-1465



Niyadjab
IS-1466



Xanuunka
waswaaska
IS-1469



Cunto dhibsi
IS-1470



Waalli
IS-1471



AD/HD
IS-1468



Kalsooni
qaanuun
IS-1467



Caawimada caafimaadka nafsadda ee Norway laga helo loogu talo galey dadka waaweyn, IS-1472
Loogu talo galey dhallinyarada, IS-1474
Ku saabsan carruurta, IS-1473



- BUP
- Carruur, IS-1301
 - Dhallinyaro, IS-1302
 - Dad waaweyn, IS-1303

Buugga yar waxaa lagala soo degayaa www.psykisk.no Ka eeg qoraallada warbixinta

Buugga yar wuxuu ku qoran yahay luuqadaha bokmål, nynorsk, ingiriis, carabi, farsi, faransiis, kurdi/sorani, boolan, punjabi, ruush, samisk, serbi/krowaati, soomaali, isbaanish, turki, urdu iyo af fiyetnaam.



Sosial- og helsedirektoratet

Utgitt av Sosial- og helsedirektoratet



MENTALHELSE